



RETURN CONSORTIUM | Somalia

Xalalka Waara sidii lagu gaari lahaa

Guulaha iyo caqabadaha
taageridda barakacayaasha sida
iskood ah ugu laabanaya gudaha
Soomaaliya

SOO KOOBID GUUD



Towards Durable Solutions | Addressing the challenges of supporting voluntary returns of IDPs in Somalia



Disclaimer:

This document represents an unofficial translation of the 'SRC Executive Summary report' published by Somalia Return Consortium in 2014. In the case of any discrepancy between the Somali and English versions of the document, the English version shall be considered.

Afeef:

Dukumiintigaan wuxuu u taaganyahay turjumaadda aan rasmiga ahayn ee 'SRC Executive Summary report' kaas oo ay daabacday Daladda Dib u Dejinta Soomaaliya ee 2014. Haddii ay jiraan wax kala duwanaansha ah, oo u dhaxeeya Soomaaliga iyo Englishka ee dukumiintiga, kan Englishka ayaa la qaadanaayaa.

Dhabaha loo marayo xalalka

In badan oo kamid ah 1.1 milyan oo soomaali ah ayaa maanta ugu nool wadanka gudahiisa barakac ahaan. iyo iyadoo ay ku jiraan Xaalado Niyad-jab ah, maalinkasta waxay ku bilaabataa su'aalo: seen wax u heli doonaa manta, seen u quudin doonaa naftayda, caruurtayda? Ma ahaan doonaan iyagu iyo anigu kuwo bed qabi doona? Iyo kuwo badan ee dadkan baahida qaba ah ee ku nool barakaca, su'aasha waxay sidoo kale soo saaraysaa: goormaan ahaan doonaa-haddii si kastaba ha ahaatee-aan awoodi doono in aan aadno gurigayagii?

Kaalmada qoysaska ku barakacay gudaha in la waydiiyo go'aankooda iyo suurtoogelinta rabitaanka xal-helida in ay qaarkood ku noqdaan guryahoodii, waa guul waxayna muhiimada uhoraysa u tahay qodobada beni'aadanimada. Waxaan ku hanweynahay in UNHCR ay awood u leedahay in ay cagta saarto wadada lagu soconayo ee soo saarista xalalka si loo dhameeyo barakaca iyo xushmaynta taasoo la samayn doono daladda dib udejinta ee isu-xilqaamay iyagoo waaya-aragnimodoodana uleh Soomaaliya.

Daladda Dib u Dejinta ee Soomaaliya waa tusaale sida aan u nahay hay'ado samafal, deeq-bixiyayaal, daneeyayaasha iyo gargaarayaasha in ay si wadajir ah u wada istaagaan iyo inay siiyaan kaalmada dadka doonaya in ay dhammeeyaan barakacooda iyo inay dib-u-bilaaban inay dib u dhisaan guriyahooda, noloshooda iyo nolosha meelaha ay ka soo jeedaan. Ku socoshada barnaamijyada xalalka ah ee Soomaaliya iyadoo loo marayo iskaashiga dawladda Soomaaliya, hay'adaha UN-ta, hay'adaha caalamiga ah waxaa waajib ah in ay ku nagaadaan xil-iska-saarkayaga iyo mudnaanta. Iyo barashada ka timid waayo-aragnimadayada waa qaybta lama huraanka u ah xil-iska-saarkan.

Iyadoo la eegayo waxqabadka iyo caqabadaha soo foodsaaray daladda dib udejinta iyo hay'adaha bahwadaagta ah, taas oo aanay sidaas u khusayn dib-u-noqdayaasha, waxaan ku dambaynaynaa runta oo ah xil-iska-saarka si looga gaaro xal waara barakaca. Casharada laga bartay waxay laf-dhabar u ahaan doontaa doodayada sida aan u horumarin karno iyo sidaan u sii wadi karno gaarista xalalka barakaca. Warbixinta la sii daayay hadda waxay muhiim u noqondoontaa qaabaynta iyo horumarinta kaalmada mustaqbalka- iyo inay awood noo siin doonto dadaalo taageero wanaagsan taasoo weli hogaaminaysa ku dhexjirka iyo baahida deg-dega ee xalalka barakaca.

In ka badan 1.1 milyan oo dad ah oo ku sugan Soomaaliya ayaa ah kuwo ku jira barakac, lagu qasbay inay ka tagaan guryahoodii, iyo in maalin kasta caruur ay ku dhalato barakaca. Sidee ayaan uga caawin karnaa ka jawaabista su'aalaha ay soo diraan qoysaska Soomalida ah ee ku nool barakaca, ee isku dayay inay ka baxaan? Sidee baan si wanaagsan uga taageeri ama uga caawin karnaa kuwa doonaya inay ku noqdaan gurigoodii? Iswaydiinta su'aalahan marka la daah-furayo waxbixintan, UNHCR waxay jeclaan lahayd inay bilowdo wada-xaajood cusub iyo dood ee xalalka mustaqbalka ee lagu dhamaynayo barakaca ee gudaha iyo agagaarka Soomaaliya.



Alessandra Morelli
UNHCR Somalia Representative

'Cawimaad kasta oo UNHCR ay bixiso oo ah in qaxootiga lagu celiyo Soomaaliya waxaa ujeedkeedu yahay in shakhsiyaadka taageero la siiyo kuwaas oo si buuxda loogu sheegayo xaalada meelihii ay ka soo jeedeen, si ay si iskood ah ugu laabtaan. Wixii dowlad ah oo UNHCR ay ku leedahay fududeynta dib u celin iskood dadku u doortaan oo abaabulan oo Soomaaliya lagu geynaayo dadkaas iyo wixii mustaqbalka ay UNHCR ku lug yeelanayso oo dadaalo ah waxay diirada saarayaan isku dhaf la sii wadi karo oo loo sameeyo dadka lasoo ceshay iyo barakacayaasha gudaha Soomaaliya in aan loo qaadan qiimeyn ay UNHCR samaysan oo ah in Soomaaliya uu badbaado ka helayo qof walba, ayadoon loo eegen qofka xogtiisa iyo daruufaha shakhsi'

Taladda UNHCR ee sare lagu xusay ee ku saabsan dib u celinta, waxay sharraxaysaa caqabada urur ka shaqeeya gargaar bani'aadannimo uu kala kulmaayo fududeynta **dib u celin iskaa ah** marka laga hadlaayo Soomaaliya, halkaas oo amni darro ay badali karto amni ahaan si aad degdeg u ah ayadoo abaaraha, macaluusha iyo fatahaaduhu ay dhibaateeyaan dadka wadankaas ayna ku qasbaan inay ka tagaan meelihii ay ka soo jeedeen ayna daganaayeen. Su'aashaan ayaa arintaasi dhalinaysaa – maxay la macno tahay in qof loo sheego in Soomaaliya gudaheeda lagu celinaayo? Maxay la macno tahay in qof si iskii u laabto kadib marka loo sheegay xaaladaha ka jira meeshii uu ka soo jeeday?

Marka sidaan looga hadlaayo, Dallada Dib Udejinta Soomaaliya, waxay hirgalinaysaa barnaamij dib loogu celinaayo barakacayaasha meelihii ay Kasoo barakaceen si iskood ah kaasoo lasoo bilaabay Agoosto 2012. Ayadoo ka kooban DRC, FAO, INTERSOS, Islamic Relief, IOM, Mercy Corps, NRC, UNHCR iyo WFP, ayaa Daladda Dib Udejinta ee Soomaaliya (SRC) waxay illaa iyo hada ka caawisay 10,909 qoys (qiyaastii 40,000 oo qof) inay ka laabtaan xeryaha barkacayaasha una laabtaan meelihii ay ka soo jeedeen oo kala ah gobolada Bay, Shabeelaha Hoose iyo Shabeelaha Dhexe, Hiiraan iyo Bakool. Daladda Dib Udejinta ee Soomaaliya (SRC), ayadoo samaysay laba wareeg oo qiimeyn kormeer ah kuna samaysay ka faa'iideysteyaal la caawiyay taasoo ahayd barnaamijayn qaadatay 1.5 sanad, ayaa waxay qandaraas shaqo siisay Samuel Hall Consulting, si uu falanqayn ugu sameeyo kormeeradaas (qeybinta iyo noqoshada kadib) uuna uga fakaro bal hadii lagu guulaystay xal waara iyo ilaa xad inta ka faa'iideysteyaashii la caawiyay ay guulaysteen iyo inuu qiimayn ku sameeyo natiijadda Dallada Dib u Dejinta Soomaaliya.

Habka iyo Baaxadda Daraasadda

Hababka tirada iyo tayada ayaa loo adeegsaday daraasadaan labadaba. Dulmar labaad iyo wareysiyo lala yeeshay masuuliyiin ayuu ka koobnaa dhanka tayada ee qaabku. Dhinaca tirada, macluumaadka ujeedka kormeerada la sameeyay ee lagu sameeyay barakacayaasha ka hor inta aan dib loo celin, qeybinta ka dib kormeerada ah iyo kormeerada qiimeynta ee celinta kadib ah ayaa la nadiifshay lana qaadaa dhigay. Wareysiyada masuuliyiinta waxaa lala yeeshay xubnaha Dallada, deeq-bixiyeyaashaa iyo ururrada kale ee cawimaada bani'aadannimo ka baxsha gudaha Soomaaliya. Intaa waxaa dheer wareysiyo si heer hoose loo dhisay ayaa lala yeeshay hoggaamiyeyaasha barkacayaasha Soomaaliya.

Daraasada waxaa lagu qeexay baaxada waxaana ku qeexay xadidaadaha soo socda:

Kooxda cilmibaarista ee Samuel Hall waxay ka koobnayd laba macluumaad qaabaa dhige iyo hoggaamiye cilmi baare oo fadhigoodu yahay Nairobi. Dhammaan macluumaadkii lasoo aruurshay ee Dalladu Dib u Dejinta Soomaaliya soo aruurisay tan iyo markii ay bilawday barnaamijkeeda waa la xoojiyay, waa la nadiifshay waana la falanqeeyay. Intaa waxaa dheer, wareysiyo ayaa lagu qaaday Nairobi iyo taleefan kuwaas oo lala yeeshay shaqaale joogay goobaha gudaha Soomaaliya.

- Samuel Hall ma uusan samayn wax macluumaad aruurin ah oo asaasi ah oo loogu tala galay daraasadaan oo dhammaan garaafyada iyo xisaabaadka xogta ah ee ku jira warbixintan waxay ku salaysan yihiin xog ay soo uruurisay Axiom (Wakiilka kormeerka ee saddexaad ee Dallada Dib u Dejinta) iyo xubnaha Dallada ee shakhsi shakhsiga ah.
- Samuel Hall wuxuu sameeyay indha-indhayn dheeraad ah taas oo uu ku sameeyay hirgalinta barnaamijka taasoo ku salaysan waxyaabihii laga ogaaday wareysiyada iyo dulmarka miiska dushiisa ah ee labaad.
- Si kastaba, tani maahan qiimeyn guud oo Dallada Dib u Dejinta Soomaaliya leedahay nafteeda, maadama kooxda cilmi baaristu aysan awood u yeelan inay tagto Soomaaliya si ay indha-indhayn ugu samayso wareysiyada kooxaha ama hab kale oo isku jamcinaaya macluumaadka aasaasiga ah iyo kan gacanta labaad.
- Waxyaabaha lasoo ogaaday ee ku xusan daraasadaan waxay ku taxaluqaan Dallada ee kuma taxaluqaan shirkado khaas ah.

Sidaa darteed, waa in la ogaado in daraasadaan ay soo bandhigayso waxyaabihii ay soo ogaadeen M&E ee SRC, marka laga hadlaayo xaalada Soomaaliya, kuwaasoo loogu tala galay ururada danaynaaya inay su'aal ka weydiyaan, ka munaas-qishoodaan, go'aan ka gaaraan kana ficil qaataan sidi borogaraamintu ay tahay inay ula qabsato xaalada is baddalaysa.

Inta Muddo ay Qaadan karto joogitaanka Assal ahaan Deegankooda

Barnaamijka dib u dejinta wuxuu sharaxayaa labo wax – dhaq-dhaqaaqa ka dhexeeya qoysaska halkaas oo xubin ama xubno ay ka tagaan VoO ee uusan qoyska oo dhan uusan tagin iyo barakaca ka dhexeeya qoysaska, halkaas oo qoysas dhan ay ka tagaan VoOs.

-Barakaca Kooxaha ka Dhexeeya. Macluumaadku wuxuu go'aaminayaa dhowr tusaale oo ah in qoysaska dib ugu guuraya xerooyinka barakacayaasha gebi ahaanba, ayagoo leh habsaanimo hooseysa inta lagu jiro PDM iyo PRA. Xaaladaha badankood habsaanimo ma jirto marka laga hadlaayo magacyada ka faa'iideysteyaasha taasoo la soo tebiyay. Istisnooyin ayaa waxaa ka mid ah in 26% qoysaska leh 3 nafar ay is dhimeen oo ay noqdeen 11% wareegii labaad ee kormeerka – taasoo ay ugu wacan tahay soo tebin xun oo jirtay wareegii 1. Habsaanimo caadi ah heer ahaan oo ah dhanka inta nafar ee qoys yahay waxay sii ahayd 2-4%, ayadoo 96-98% qoysaska la caawiyay ee Dallada Dib u Dejinta caawisay ay weli daggan yihiin tuulooyinkii ay ka soo jeedeen tan iyo markii soo celintu dhacday dabayaqadii 2012 ama 2013.

-Dhaqdhaqaaqa Qoysaska ka Dhexeeya. Wuxuu go'aaminayaa isbadal ka duwan kii horre. Inkastoo 5% IS dadka ka jawaaba ay soo sheegeen qorsheyaal uu ugu yaraan ku tagaayo hal xubin oo qoyska ah uguna tagaayo goobta barakaca, 20% Wareega 1 PRA dadkii ka jawaabay waxay soo tebiyeen in ugu yaraan hal xubin oo qoyskooda ka mid ah inuusan la noolayn oo uusan kula noolayn goobta laabashada taasoo sii korortay intaa ka dib oo gaadhay 60% kooxda 2. Dhaqdhaqaaqyada laabashada ee qoysaska qaar waxaa lagu sharaxay amni darro inay ka dhalatay, taasoo ka dhigaysa marka arinkan loo eego barakac soo cusboonaaday; laakiin sidoo kale ay ugu wacan tahay fursado maciishad sidii hore ka wanaagsan iyo asbaab kale oo aan lala xiriirin barakicin qasab ah, taasoo ku keentay qoysaska qaarkood in xubno ka mid ah ay meel kale u guuraan.

Xogta Barakacayaasha

- **Gobolada Barakaca.** Dadka jawaabaha baxshay badankood ee kormeerkii ujeedka waxay kasoo barakaceen Shabellooyinka, Bay, Hiraan ama Banadir. Wax yaabaha la ogaaday waxay caddeynayaan waxa daraasado kale lagu ogaaday – 60% barakacayaasha kusugan Muqdisho waxay ka yimaadeen labada Shabelle, Bay iyo Bakool maadaama Shabellaha hoose iyo Bakool ay macaluushii 2011 ay aad u saamaysay¹.
- **Asbaabta Barakaca.** Dadkii jawaabaha baxshay waxay badankoodu tilmaameen in abaartu ay ahayd sababtii ugu weyneyd ee ay u soo barakaceen halka 18% ay sheegeen in amni xumo ay ahayd wixii ay uga soo hayaameen meelihii ay kunoolaayeen. Fursadaha shaqo iyo gargaarka bani'aadannimo ayaa noqday boqolkiiba wax yar sababo dadku ay usoo guureen.
- **Mudada Barakaca lagu jiro.** Ku dhawaad dhammaan dadka jawaabaha baxshay waxay joogeen hal ama laba sano ayagoo barakacayaal ah, waxaana barakacooda sabab u ahaa abaar inta badan, ayadoo in badan ay amni darro soo barakicisay amni daradaas oo ka dhacday meelihii ay ka soo jeedeen.
- **Asbaabta Laabashada.** Kooxda ugu badan ee jawaabaha baxshay waxay soo tebiyeen in amni baahsan oo ka jirtay meelihii ay ka soo jeedeen ay tahay sababta ay u laabanayaan, inkastoo kooxo badan ay sheegeen rabitaan ah inay laabtaan si ku meel gaar ah si ay xili roobaadka wax u soo beertaan, ayadoo koox badan oo taa la mid ahna ay go'aansadeen inay aruursadeen keyd badan oo ay noloshooda dib ugu bilaaban karayaan. Teeda kale dad laga tiro badan yahay oo laakiin badan oo ka mid ah dadkii jawaabaha baxshay waxaa qasab ku noqotay inay tagaan oo goobta ka tagaan amni darro aawadeed ama in qasab looga waday. Qof jawaabay oo qur halna ha ahaadee ma uusan sheegin in waxa laabashadiisa keenaya ay tahay shaqo la'aan ama la'aanta cawimaad gargaar oo ka jirta xerada barakacayaasha.

¹ ICRC, Muqdisho Kormeerka Barakacayaasha, 2012

- **Xaaladaha Laabashada.** Dad badan oo jawaabo baxshay ayaa tilmaamay in go'aankooda ay ku laabanayaan uu ahaa shardi ku xiran asbaab dhowr ah. Sababta ugu weyn ee sababaha ayaa ah in ay heleen gaadiid si bilaash ah ku qaadaya, taasoo ay soo raacdo cawimaad dhanka beeraha ah oo la siiyay iyo amnigii oo soo hagaagay. 5% dadka jawaabaha baxshay ayaa tilmaamay inay xubno qoyskooda ka tirsan ay doonayaan inay uga tageen xerada barakacayaasha.
- **Xaaladaha Maciishada.** Badi dadkii la wareysatay ka hor barakaca waxay ahaayeen beeraley, ganacsato ama waxay ahaayeen beeraley xoolo leh. Ayadoo hawlo shaqo ah inay qabtaan bilaabay markii ay barakaceen sida xamaalinimo ama shaqo guri inay ka shaqeeyaan. Laba meelood marka saddex laga dhigo dadka la wareystay ayaa waxay awoodeen inay qoysaskooda daryeelaan marka la cesho ayagoo adeegsanaya xirfadahooda ay doorteen, halka kala bar inta soo hartay aysan go'aansan waxay qaban doonaan.
- **Caqabadaha la filan karo marka la Laabanayo.** Laba ka mid ah shantii qof ee la wareystaba waxay ka cabsi qabeen in waxa ugu weyn ee soo wajihi doona marka ay laabtaan ay tahay raashin yari , halka in ka yar kala bar dadkaa ay ka baqayeen shaqo la'aan, ayadoo dad laga tiro badan yahay oo yar ay ka walaacsanaayeen caafimaad iyo waxbarasho, iyo caqabado dhanka beeraha ah. Laba boqolkiiba ayaa ka walaacsanaa ammaanka.

Qaybinta xirmooyinka heerka ugu hooseeya²

- **Qaabka Qeybinta.** Barnaamijyada qeybinta isku mid ayay u ahaayeen dhammaan dadka la celinaayo ayadoo kala duwanaansho gaar ah oo dhanka gobolba sida uu yahay ku xiran ay jirto. Ku dhawaad dadka oo dhan ma aysan helin boonooyin noocii ay ahaadaanba, ama lacag caddaan ah oo guri loogu tala galay iyo alaabo. Sababta arintan ayaa ah in waqtigaan, urur wax dira ama SRC xubin ka mid ah inuusan isticmaalayn habkaan si uu u baxsho SMP.
- **Farqiga Soo Kala Dhexgala Waxyaabaha Xirmooyinku Ka Kooban Yihiin.** Waxa aad loo codsaday wuxuu ahaa maro kaneeco, ayadoo shantii qofba labo ay ku qoraayeen meesha ugu sareysa liisaskooda. Durba tani waxay kusoo dhacaysaaa fikirka ah in 60% dadkii jawaabay ay dhawaan soo sheegeen in malariya jirto.
- **Muhiimada iyo tayada SMP:** Jawaabaha su'aalaha kusaabsan muhiimada iyo tayada waa la helay ayadoo ay adkaatay sidii loo falanqeyn lahaa maadaama waxyaabuhu kala duwan yihiin min hal jawaab bixiye ilaa kan kale. Si kastaba, kooxdu waxay sameysay falanqeyn daraasad taasoo ay ku sameeyeen wareegii ugu dambeeyay ee PDM ee hal kiis. Xatooyo ayaa sidoo kale aan u muuqan inay kujiro kiiska maadaama kolomyada la xiriira dhammaan lagu buuxshay "Maya". Si kastaba, natiijooyinka su'aalaha waa kuwo wax muujinaya oo kaliya waxayna u baahanayaan in sifeyn weyn lagu sameeyo oo dhanka qoraalka ah inta macluumaad uruurintu socoto si qiimeyn aad ah loogu sameeyo.
- **Qeybinta Tayadeeda.** 93% dadkii la wareystay waxay dhaheen maya markii la su'aalay in lacag lagu siyay in lagu daro liiska qeybinta. Qofna ma sheegin in lacag lagu siiyay in lagu daro liiska qeybinta. 94% waxay sheegeen inaan loo sheegin alaabada ay helayaan nooca ay tahay ka hor inta qeybinta aan la bilaabin ayadoo dad badan oo ah – 93% soo sheegeen in aan loo sheegeen alaabada ay helayaan nooca ay tahay inta qeybintu socoto - 93% ayaa sheegay inaysan wax amindaro ah lakulmin in lagu guda jiro ama kadib qaybinta.

Mudo Inta Xaaladaha Nololeed Ee Dadka Lasoo Ceshay Ay Socon Karaan

- **Nooca Guriga.** Ayadoo saddex meelood meel kaliya dadkii la wareystay ay filayeen inay kunoolaadaan guryo kumeel gaar ah kormeerkii ujeedka, ayaa saddex meelood afar meel ay soo tebiyeen kunoolaanshaha guryo kumeel gaar ah laabashada kadib.
- **Tayada Guriga.** Ayadoo in ka badan kala bar dadka la wareystay ee kooxda kow ay soo tebiyeen in guryahooda ay xaalad fiican ku sugnaayeen wareegii koowaad ayaa markii la soo gaaray wareegii labaad saddex qof afartii qofba waxay soo sheegeen in guryahoodu xaaladu xun ku sugnaayeen ayagoo soo daroorsha.
- **Ammaan Darro.** Ayadoo 2% oo qura dadkii la wareystay kormeerkii ujeedka ay filayeen inay amni darro soo wajahdo taasoo ah caqabada ugu weyn marka ay laabtaan ayaa 40% ay ula muuqatay in amni darrada iyo dagaalku yihiin dhibaataada ugu weyn ee noloshooda la soo darsi doonta marka ay laabtaan.

- **Dagaal.** In ka badan afar shantii qofba waxay sheegeen in weerar toos ah loo geystay saddexdii bilood ee la soo dhaafay, taasoo ay sii dheer tahay warbixino aan had iyo jeer ahayn oo ku saabsan xadidaad dhanka dhaq-dhaqaaqa ah, guur qasab ah iyo weerar dhanka galmada ah.
- **Caafimaad.** Labada walaac ee ugu weyni waa helitaanka daryeel caafimaad iyo daaweynta laga helo goobahaas.
- **Cunto La'aan/Yari.** Warbixino ku saabsan raashin yari ayaa aad u badnaa ayadoo shantii qofba labo soo tebiyeen inaysan helin raashin ku filan ugu yaraan hal mar asbuucii tagay.
- **Maciishada.** Ayadoo in ka badan laba meelood saddexdii melba dadka jawaabaha baxshay IS ay filayeen in beeraha, xoolaha iyo ganacsigu noqdaan waxyaabaha ugu weyn ee dakhliga ay ka heli doonaan marka ay laabtaan ayaa 57% dadkii lagu wareystay PRA waxay sheegeen in waxa ugu weyn ee ay kunoolaan doonaan ay tahay raashin gargaar ah ama sii gaditaanka raashinka.

CAQABADAHA IYO DHIBAATOYINKA SOO WAJAHA BARNAMIJKA

Borogaraaminta

Ammaan darrada: Gobolada koofurta iyo bartamaha Soomaaliya halkaas oo dadka inay ku noqdaan lagu taageerayo ayaa waxaa ka muuqda daliilo ah inay jiraan xaalado liita oo ammaan darro iyo colaad ah ayadoo aysan waxba soo kordhin hawlgaladii dhawaan AMISOM ay samaysay taasoo su'aal ku dhalinaysa waxa dadka laabanaya qudhoodu u laabanayaan iyo dadkii horay u laabtay intaba.

Hubinta ujeedka laabashada iyo joogitaanka weli waa caqabad: xaqiijinta dadka sida dhabta ah u doonaya inay laabtaan isla markaana doonaya inay dadaalaan si ay isu caawiyaan muddo dheer marka loo eego kuwa doonaya inay u laabtaan raashinka gargaarka ah dabadeedna ay u soo laabtaan xeryaha barakacayaasha si cawimaad dheeraad ah ay u helaan waa caqabad weli taagan.

Tijaabooyinka in qofku uu Safar gali karo oo aan si Habboon loo Hirgalin: Qofi inuu caafimaad qabo oo safar gali karo baaritaankeeda ka hor inta uusan tagin si loo ogaado qoysaska cawimaada gaarka ah ee caafimaad u baahan looma samaynayo si joogto ah ayadoo la marinaayo dhammaan ka faa'iideysteyaasha Dallada caawisay.

Xiriir u dhexeeya ururada kale VoO oo aan jirin: Ayadoo warbixinada hawlgalka ee tuulooyinka dadka lagu celinaayo ay sharraxayaan isla markaana sheegayaan baahida loo qabo in la xiriiro hay'ado kale sida UNICEF si loo ogaado in tuulooyinka dadka lagu celinaayo ee meelaha borogaraaminta ururadaa kajirto, ayaa waxa Dalladu aad diirada u saareysa ay weli yihiin celinta.

Kala duwanaansho ka jira adeegyada VoO: Ogaanshaha adeega ee la sameeyay ayadoo loo diray ururo waxaa lagu ogaaday inay jiraan kala duwanaanshiyo habboon oo ah dhanka helitaanka caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo nadaafada, badbaadada, iyo maciishada².

Fahan kala duwan oo kusaabsan natiijada mashruuca: Wareysiyo lala yeeshay masuuliyinn ayaa muujiyay kala duwanaansho u dhexeysa xubnaha marka laga hadlaayo natiijada ay garteen ee ah in Dallada ay kujirto. Badankood waxay dareemeen in dadka la celinaayo ay ku roonaayeen VoO baddalkii xerooyin barakacayaal, laakiin ma aysan awoodin inay muujiyaan waaritaanka a) adeegyada kajira VoO inay yihiin kuwo ku filan oo la sii wadi karo iyo b) ujeedka ah in dadka la celinaayo inay sii joogaan VoOs kadib marka SMP ay dhammaadeen.

Caqabado hortaagan la socoshada kalandarka laabashada: xirmada maciishada waxaa loogu tala galay in ay u saamaxdo ka faa'iideysteyaasha inay abuuraan dalag waqtiga roobka. Sikastaba safrinta ayaa badanaa daahda waxayna ka duwdaa dadka jadwalka celinta. Farsamo ahaan, qoysaska badidoodu ma awoodaan inay waqtigii la rabay arinkaa ku sameeyaan. Hannaanka waxaa xaddida qarash la'aan, caqabado ay keenaan dowladaha meesha maamula iyo hoggaamiyeyaasha maxaliga ah, gaadiid la'aan iyo caqabado kale.

Deeq bixiyeyaasha oo ka daala maalgalinta barnaamijyo muddo dheer: kadib markii ay ka soo wareegtay laba sano oo ah hannaan dib u celin oo ku kacay qiyaastii 25 M USD oo ay kujiraan taageero lacag caddaan ah iyo

² War bixin sahanedkii hay'adaha badan ka sameeyen Baydhabo Maarso 2013

cawimaad alaabo ah, waxaa la ogaaday in deeq-bixiyeyaashu ka daaleen maal galinta waqtiga dheer qaadata ee barnaamijyada bani'aadannimo, gaar ahaan mawduucyada badbaadinta lagu dhammaystiraayo hawlaha celinta kadib ah ee la bilaabay. Tani waxay gaar ahaan run ka tahay mashaariicda waqtiyada dheer qaata ee aan laga helin faa'iidooyin muddo gaaban.

Ururuinta Xogta, Falanqaynta iyo Dabagalka iyo Qiimeynta

Khayraad la'aantu waxay saameynaysaa soo ururinta macluumaadka inta lagu guda jiro PRM: Rumaysasho cadayn la'aan-qaybta seddexaad ee hay'ada dabagalka waxay heshiis is faham la saxeexatay daladda dib udejinta ee soomaaliya. waxkastaba ha ahaatee, si maamulku u fududaado, waxaa qandaraas lagu siiyay hay'add walba oo ka tirsan daladda - DRC, Mercy Corps iyo INTERSOS - ilaa hadda, si loo maamulo PDM-ka iyo PRA-da marka aan ka eegno barta soo ururinta macluumaadka. Adeegani waxaa uu adkaynayaa xaalada sida rumaysasho cadayn la'aan inay siiso hay'ad kastaa codsiyo kala duduwan. Dakhli ku filan la'aan awgeed, PDM-ka iyo PRA waxay si wadajir ah u wada qabtaan, suurto gelinta a) jawaabo aan hagarbax lahayn. b) ka hortaga in wadadu bayrto ee hadda la hayo.

Khayraadka yar ee lagu Maamulayo Macluumaadka iyo Kormeerka: Waxaa jiro hal qof oo u xilsaaran maamulida macluumaadka kaasoo maamulaya macluumaadka taas oo ay soo saartay daladda iyo dabagalayaasha ee hanaanka F&C. Marka la soo gaaro xilliga waraysiga waxaa weheliya qofka u xilsaaran maamulida macluumaadka, shaqooyin badan oo ku haboon macluumaadka oo kombiyuutarka la gelinayo waxaana waqtiyeey arintani maamulka.

Warbixinta uusan qabsanin IS, ama qalabka kale ee M&E: Waxaa jira macluumaad qaybo fure taas oo ah hadda uusan qabsanin qalabku Laakiin ku haboon qaaba dhigida xalalka waara. Waa kuwan:

1. Kooxda Maamusha ee bulshada martida loo yahay ee xaafada laga soo jeedo ka faa'iidaystayaasha dib-u-noqday
2. Qabiilka ugu badan/ugu yar ee dhaqdhaqaaqa dib-u-soo noqdayaasha
3. Xaaladaha 15% kiiba ka faa'iidaystayaashu dadka martigeliyayaasha ah
4. Danaynta difaaca: guur khasab ah, arinta difaaca caruurta, shaqaaqada ku salaysan dhedig laboodka iwm
5. Caqabadaha soo foodsara inta lagu guda jiro guuritaanka laga guurayo xeryaha barakaca ee loo guurayo xaafadii asalka ahad
6. Xaaladaha nolosha ee ka jira kaamamka barakaca
7. Xaaladaha nolosha ka hor barakaca

Marin macluumaad adag ah oo aan ka jirin ururka/dalladda laabashada soomaaliya: Haddii loo eego ilo kala duwan oo macluumaad kuwaas oo xubnaha SRC uruuriyeen – PRM, PRA, PDM, IS, GSV warbixinno iyo kuwo kale – waxa waqti xaadirka maqani, waa nidaam isu keena dhammaan macluumaadkan gabal-gabalka ah si joogto ah si iyaga loogu lafa guro heerka khiddadaynta.

Isgaarsiin iyo Xiriirin

Aqoonsa-shada iyo Fulinta: Waxaa la ogaaday in markii lagu guda jiray barnaamijka SRC, baahida looqabo in loo fidiyo taageero iyo taxaddar arrimaha ay ka mid yihiin la socosho joogta ah ee xaaladda nabad-gelyo, xoojinta qaababka bulsho ee jira, u doodidda ku aaddan ambaqaadyada horumarineed ee ay bulshadu waddo, taba-barid ku saabsan GBV iyo Difaaca Caruurta iyo gargaarka ka warhaynta ayaa la iftiimiyay. Si kastaba, marka laga hadlayo fulinta, weli tan su'aal baa ka taagan. **Xiriirinta Nayroobi gudaheeda ah halkay Soomaaliya ka ahaan lahayd:** Daneeya-yaal fara-badan oo loo waraystay daraasaddan sababteeda ayaa muujiyay dareen ah diirad saaridda wada-xaajoodyada badankooda ku saabsan in loo leexiyay Nayroobi halkaa soo kulannada badn-kooda ay ka dhacaan caasimadda Kenya gudaheeda halkii ay ka ahaan lahaayeen Muqdisho gudaheeda. Waxay tani keentay a) xiriirin ah heer goob shaqo iyo b) isku-xir u dhaxeeya barnaamij-yada kale ee lagu fuliyey gudaha goobaha laabashada⁴.

Xiriirin La'aan jirta oo la la yeesho mashaariicda kale ee xilligoodu dheer-yahay lagana fuliyey gudaha goobaha laabashada: SRC waqti-xaadirka lama laha isku xir adag mashaariicda bini-aadanimo/horumarineed ee xilligoodu dheer-yahay ee lagu fuliyay mid-kood gudaha degsiimada IDP-ga ama gudaha VoOs-ka. Tani waxa ay si weyn u saa-meenaysaa awooda SRC ay ugu doodikarto in lasii irsaqo dadka ku noqday deeganadoodii horre, si ay uga hortagto in ay makale dib ugu laabtaan degsiimadii ay barakaca ku ahaayeen.

GUUL KA GAARISTA BARNAMIJKA

Xiriirinta u dhaxaysa xubnaha ururada: Maadaama mashruuca hadda ee Daladda waxa uu ku negaanayaa xadidnaanta lagu caawinayo dadka gudaha ku barakacay ee iskood dib ugu laabanaya, xiriirintu waxay ahaan doontaa sidoo kale mid wax gal ah. Inta badan xubnaha ururadu waxay wada fahmaan oo ay wadaagaan ujeedo isku wada mid ah. Shirarka Gudiga joogtada ee majaraha u haya iyo TWGs waxaa loo qabanayaa dhamaystirka faafinta waraaqaha lafaguran iyo dabagalka macluumaadka ee lasoo saaray.

Natiijada iyo Hannaanka Cabashooyinka: Qaybinta telefoonada gacanta iyo u furitaanka laymanka qalabka casriga ah ee ka faa'iidaystayaasha oo ay la tagaan natiijadooda ayna ku soo diraan cabashooyinkooda, dallada dib u dejinta waxay dejinayaan kanaal toos ah oo ay ka faa'iidaystayaashu toos kala soo xiriiri karaan xaafada ay ka soo jeedaan, inkastoo badanaa wacitaanada iyo fariimahu ay soo marayaan hannaankan oo haatan aan jirin, waa wado wax gal ah oo lagu ilaalinayo waxa ka soo baxa.

La xisaabtanka iyadoo loo marayo qaabka shaqada ee dabagalka iyo qiimaynta: Hannaanka la xisaabtanka si uu u hubiyo isticmaalka dakhliga la bixiyay waa in lagu xisaabtamaa, la tixgeliyaa furaha si loo dhiiri geliyo deeq bixiyayaasha si ay u sii wadaan taageeradooda. Tani waxaa hadda sameeyay Daladda iyadoo isbadalo yar jiraan, si ay u noqoto aalad xoog badan oo loogu doodo iyo warbixinada deeq bixiyayaasha ee mashruuca iyo dhibaataada dib-u-noqdayaasha.

15% ka faa'iidaystayaashu waa kuwo badankoodu dayacan oo ka mid ah bulshooyinka martida loo yahay: Si loo hubiyo in bulshooyinka martida loo yahay in aanay dareemin in la xumeeyay marka dib-u-noqdayaashu ay helayaan qorshaha kaalmadooda, dhammaan hay'adaha aadaya waxaa looga baahanyahay in ay bixiyaan kaalmo isku wada mid ah ee qoysaska badankoodu dayacan oo ka mid ah bulshooyinka martida loo yahay.

Qorshaha Dallada Dib u Dejinta ee dadka ku laabanaya magaalooyinka: Dhawaan waxaa hirgeliyay Hay'ada NRC, xajmiga xaalada ee dib-u-nodayaasha magaalooyinka waxaa lagu caawinayay qorshe magaalada oo gaar salna u ah tijaaboo halka laga door bidayo qorshaha hab-nololeedka magaalada ee joogtada ee ay qaabaysay hay'ada FAO. Tani waxay hubaal ka dhigaysaa in kuwa ka yimid asal ahaan degaanada magaalooyinka inay helaan qorshaha taas oo wax ka taraysa dib-ula-qabsigooda. Qorshe magaaladu waxaa si dhakhsha ah loogu dari doonaa hanaanka kaalmo ahaaneed ee Daladda Dib u Dejinta.

IOM TVET Keeda iyo Mashruuca Tababarka Xirfadaha ee Baydhabo: IOM oo ay la shaqaynayso INTERSOS waxay ka fulinayeen mashruuc Baydhabo kaas oo gaadhay meel dhaafsan SMP. Ku dhawaanshan soo socda ee aasaas u ah bulshada, mashruucu waxaa ahmiyadiisu tahay in uu siiyo dumarka iyo dhallinyarada isbedel nololeed sida bilow ganacsi³. Inkastoo nabadgelyo daradda ee tuulada asalka ah ay ka hor istaagayso ka faa'iidaystayaasha mashruucan kasoo ay bilaabi karaan ganacsigooda, mashruucyadan oo kale waa in ay sahamisaa ama usamaysaa dallada dib udejinta barakacayaasha dib-u-soo noqday.

Sahano dhaqdhaqaaq: Inkastoo ay tahay mid aan suurtoagal ahayn in la isticmaalayo ama in laga hirgeliyo Sahano dhaqdhaqaaq meelaha ay al-shabaab haysato, tani waxaa si wanaagsan looga isticmaalay in macluumaad laga soo ururiyo sahan ula kac ah meelaha ay degan yihiin barakacayaasha ee Muqdisho. Sahanadaan dhaqdhaqaaq waxay qaataan waqti yar iyo in isla markiiba xogta lagaliyo halka lagu keediyo, waxayna yaraynaysaa khatarta khaladaadka marka xogta combiyuutarka la gelinayo.

Wadaaga Macluumaadka: warbixinada ay soo saarto qaybta seddexaad ee hayada dabagalka iyo xubnaha hayada midowga waxay ku wareegaysaa liiska waraaqaha ee midowga hayadaha. Daneeyayaashu waxay sheegeen wixii xogta warbixintan ee bixinaya xogta meelaha taasoo aanay geli Karin.

³ Waraysi lala yeeshay IOM Waxaana lagu qaaday warasyiga xaafiiska IOM ee Soomaaliya ee Nairobi ku yaala bishii Abriil

Warbixintu waxay soo bandhigaysaa qorshe talo bixin 15-dhibcood ku salaysan ee natiijadooda, wadar ku salaysan aasaaska barnaamijenta. Xiriirin iyo maaraynta macluumaadka ama baarista iyo qiimaynta.

1. Talabixinadda Barnaamijenta

1. **Dib-u-dersida hanaanka hawgalka la raaco** waa in la sameeyaa marka baahi soo baxdo si loo hubiyo in ay ka turjunto waadaxnimada mawqifka soomaaliya iyo tixgelinta waxa ku biiray caqabadaha soo foodsaara marka hayadaha loo diro aagagaas.
2. Shaqaaqada kufsiga ee dhedig-laboodku waa in loo isticmaalaa fursad lagu qabanayo adeeg khariidado (sawiro) marka hayadaha loo dirayo meelaha dib-u-noqoshada.
3. Daladda waa inay xooga saartaa xiriirka horumarineed ee u dhexeeya kaqaybgalayaasha samafalka iyo horumarinta ee degaanada barakacayaasha meelaha lagu soo noqday si loo horumariyo inay sideedii hore ku soo noqdaan bulshooyinka barakacay.
4. Ka qaybqaadasha bulshadu waa muhiim in laga ilaaliyo wax faragelin ah iyo in la xasiliyo dib-ula midoowga dib-u-noqdayaasha.
5. Isha ugu weyn ee kaalmada barakacayaasha soo noqday waxay ka imaanaysaa bilaabida dawlada iyo mashruucyada qaranka ee u ogolaanaya in looga baxo hanaankii loogu wareejin lahaa iyo in la taageero syaasada horumarinta qaranka si loo dejiyo qaab-dhismeed lagu aqoonsado iyo in lagu hubiyo xuquuqaha barakacayaasha (horumarinta saldhig qorshe fulin ee cashiradda waaya-aragnimo ee laga soo bartay midowga hayadaha dib-u-noqoshada.
6. Tani waa inay la socotaa iyadoo la dhisayo awooda kuwa booska dawlada jooga labada heer qaran laakiin waxaa aad u muhiim ah deegaanka –meelaha barakaca iyo dib-ugu-soo noqoshada-heer).
7. Xoojinta difaaca Isha ugu weyn iyo tababarka difaaca ee xubnaha midowga hayadaha dib-u-noqoshada., si loo hubiyo joogid ku filan saraakiisha difaaca ee aaga, in iyaga la isku xiro iyada oo ay la socoto unuga macluumaadka ee hayada midowga dib-u-noqoshada.dabagalkan difaacu waa inay taakulaysaa taageerada cadayn aasaasi ah ee hanaanka muuqaalka difaaca barakacayaasha, iyo hadafka u dambeeya ee lagu xoojinayo hanaanka difaaca.
8. Hanaanada ku wareejinta ee dacwooyinka difaaca iyo nabadgelyo-darada taasoon toos ugu hoos-dhacayn awooda midowga hayadaha dib-u-noqoshada laakiin waa in la indhadheeyaa aaga oo uu lahaadaa aasaas cad,midkood xiriir isku-urursan, loo leh ciwaan iyo waqtiyo waxqabad oo ka abuuran heer goob(meel) ama hayadaha ugu muhiimsan ee kaalmada ee ku deeqa difaaca iyo kaalmada ee goobaha.

2. Tallo bixino ku saabsan Hawlaha Xiriirinta

9. **Uhadlid badan** oo loogu talagalay kuwa laabanaya badan-kooda oo iftiiminayanacaqabadaha xilliga-dheer ee iyaga soo wajahay si loo gaaro xalal waara oo ah VoO ayaa aad loogu talo-geliyaa ururkii.
10. **Ka qayb-qaadashada Hannaanka Isdhexgalka** ee SRC ayaa u oggolaan doona qaar ah isku-xirrada lagu sameeyey cutubkan inuu ahaado mid la habeeyey oo laguna xiray hannaanka noqoshada IDP ee ku aaddan hannaanka isdhex-galka.
11. **Raadi hay'ado lala hawl-galo iyo xiriir lala yeesho hay'aadka ururada rayidka ah** sida Zamzam, ORDO, Hijra, Feero iyo International Relief, Swiss Kaalmo iyo kuwo kale oo ah hay'aad shaqaynaya waqti-xaadir kana fulinaya Caafimaad, Waxbarasho, WASH iyo mashaariicda nolol-maalmeedka.
12. Iyadoo la isticmaalayo xogta lahayo **isku-habee siminaarada xubnaha SRC ee loola jeedo lafa-guridda joogtada ah ee SWOT** iyo horumarinta/la xisaabtamidda ee ah shaqada laqabtay. Intaa waxaa

dheer, ee ah sida ugu suurta-galsan, kulamada xiriirinta waa in lagu fuliyaa goobta shaqada ee Soomaaliya halkii ay Nayroobi ka noqon lahayd.

13. **Meelo cilmi-baaris u baahan oo dheeraad ah:** Ogaansho qoto-dheer oo lagu dersayo xaaladda goyska noqonaya, qiimayn loo dirayo hay'aadka buuxiyay hab-raacyada shaqo iyo heer-cabbirka SOP-ka, qorshaynta adeegyada ee degaamada IDP-ga iyo VoO ee noqda-yaasha oo qayb ka ah cilmi baarista lagu dersayo dhisidda soo kabashada ayaa ah kaliya meelaha qaar halkaa soo ay ka jirto baahi ah in la sameeyo cilmi-baaris ku salaysan goobta shaqada iyo caddaymo, si loo wargeliyo barnaamijyada mustaqbalka iyo waqti-xaadirka ee SRC si ay uga sii wanaagsanaadaan.

3. Talo bixino ku saabsan Xog Uruurinta, Maamulidda iyo Lafa gurida

- 14 Tallaabooyin-kan soo socda ayaa lagu talo-bixiyaa dhinaca **xog uruurinta** iyadoo qayb ka ah qaabka-shaqada ee M&E:
 - a) **Xog uruurinta elektrooniga ah** isticmaalidda sahminata telefoonka gacanta waa in la isticmaalaa si loo yareeyo khatarta khaladaadka oo loona oggolaado xog qaadid isla markiiba dhacaysa iyo lafa-gurid. **Xiriirinta GPS-ta** waa in la qoraa xog gelin kasta oo ah M&E iyo IS meeshii suurtagal ah. Intaa waxaa dheer **heer-cabbir ah qorshe xog ururineed waa in la dejiyaa**, ay ka mid yihiin aalad lagu abuurto sahmin, mashiin soo saara waraaqda sahminata, meesha caadiga ah ee xogta laga geliyo iyo warbixin soo saare. Tan waa in la raaciyaa **xog gelin caadiya iyo qaab warbixineed** oo leh xog la xaqiijiyay oo adag oo lagu fuliyey barta gelinta xogta.
 - b) **Qeexitaanno iyo muujinta xuruufta** oo loogu talo-galay IS, PDM iyo PRA (xuruuf baaqeedka qabiilka, jifida, gobolada, degmooyinka, tuulooyinka, heerka waxbarasho, qaybaha da'da iwm.) la isku raacay. Intaa waxaa dheer **liis ka faa'iidayd-tayaal oo nooc gooniya** ah ayaa ay tahay in ay isu keenaan laanta ururka ee maamusha xogta, si loogu oggolaado in dabagal lagu samayn karo oo si muuqatana sambal loogu samayn karo. Tan waa in ay ku jiraan kuwa lagu caawiyay soo laabashada iyo kuwa la siiyey SMP.
 - c) **Marxaladaha maraya PRA** waxaa looga baahanyahay in ay qabato xogta marxaladaha mara – si ay u qaabayso horumarka duruufaha nolo-leed ee noqda-yaasha kuna aaddan qaybaha muhiimka ah sida nolol-maalmeedka, hooyga, caafimaadka, iyo dakhliga. Sidaa soo kale, iyadoo ay ku salaysan-tahay sida loo helo khayraadka, SRC waa in ay sugtaa jadwal nidaamsan oo loogu talo-galay PRA, oo ay tahay in loo raaco sida ugu suurtagalsan ee goobta shaqada gudaheeda. Sambalku waa in uu ka turjumaa isbeddelka iyo isu dheelitirka ee u dhaxeeya bulshada martida loo yahay, noqda-yaasha u dhaxeeya muddooyin waqti oo kala duwan oo si waadax ahna loogu miijiyey FGDs. Intaa waxaa dheer, kaydka xogtu waa in uu **si cad u kala saaraa kooxaha la beegsanayo** –
 - Kooxda ama wareegga cayiman ee jawaab bixiya-yaasha PRA
 - Bulshooyinka martigelinta ee ay caawisay SMP
 - IDPs-ka aan soo noqonayn si ay ugu adeegaan sidii koox la xakameeyo
- 15 Marka laga hadlayo **Maamulidda Xogta**, talo-bixinnadan hoose ayaa cilmi baaristii ka soo baxay:
 - a. **Nidaamka maamulidda xogta ee onlaynka ah** waa in uu ahaadaa mid isticmaal-kiisu u sahlan-yahay maamulaha xogta iyo sidoo kale dadka booqanaya websaydka (shabakadda). Waa in ay bixisaa macluumaad dhan oo waqtiga la socda kuna saabsan hawlaha ururka si si fudud loogu heli karo. Sidoo kalena dhammaan warbixinnada ururka waa in la heli karaa si looga soo rogto khadka internetka ee lagu keydiyey.
 - b. **Nidaamyada lagu hubiyo tayadu** waa in ay ku jiraan marxalad kasta si hubaal looga dhigo in xogtii la geliyey iyo in gacmihiis beddelayey ay saxyihiin nadiifna yihiin.
 - c. **Marin kaliya oo macluumaad** SRC ayaa si bartamaysan u maamusho, taas oo uruurisa isuna keenta macluumaadka, ka warbixisa oo uruurisa xogta laga dhaliyey iyadoo loo marayo barnaamijka noqoshada. Tani kaliya kuma xaddidna nidaamka on-laynka, laakiin khayraadka bini-aadamka ee u huray ururinta ee dhammaan xogaha loo kuur-galay oo ayna diiwaan-geliyeen xubnaha ururka ee goobta shaqada, iyo waqtigoo-dii ay ku lafa-gureen. Iyadoo la eegayo qani-

nimada xogta ay soo uruuriyaan ururku, tani waxay u baahataa koox ah 3-4 qofood, kuna jiraanna saraakiisha kormeerka.

- d. **Dejinta qorshaha lafa-guridda:** muhiimadda ay leedahay lafa-guridda xogtu waa in la aqoonsado jawaabaha aad rabto waxa ay yihiin iyo goorta aad iyaga rabto. Isla marka tan la ogaado, SRC waxa ay dejin kartaa nidaamyo otomaatik ah iyo jadwallo lagu soo saaro asbuucle, bille ama lafa-gurid rubac le ah ay lajiraan tusayaal aan badnayn oo muhiim ah, laguna dhammays-tiray xog laan xisaab lagu cabbirayn oo la lafa-gurayo.
- e. **Isbeddel qorshayn** wuu ka caawin doonaa ururka in ay fahmaan isbeddelada duruufaha nolo-leed ee ururka haddii la lafa-guro kaddib waqtiyada joogtada ah si loo arko isbeddelka dhacay waxa uu yahay inta waqtigaa lagu jiro iyo sidoo kale in la aqoonsado nuglaanshaha khasatan la xiriira barakaca (isu barbar dhigidda kooxda la xakameeyey)

FARIIMAHA MUHIIMKA AH

Sarre-kac nabadgelyo darro. Dhacdooyinkii dhoweyto sida gulufkii AMISOM waxa uu horseeday barakacyo lagu warbixiyey 7300 00 ashkhaas illaa June 2014. Somalia HCT horey bayba uga digtey barakac sii kordhaya oo ah dad ka imanaya goobaha miyiga ah oo soo aadaya xarumaha magaalada ee meela-yawga koonfurta iyo bartamaha, halkaa soo helitaanka adeegyada aasaasiga ahi ay dhici karto in aad loo xaalufiyay, caruur la qorto oo tiradeedu aad u sarayso, iyo sare-kac aad ah oo ku saabsan rabshado galmeed.

Doorasho Adagg:Fududeynta ku Ibaashada iskeedka ah ee laga warbixiyey ee ah goobaha aan Nabdooneen. Sare ukaca nabad-gelyo darrada Koonfurta iyo Brtamaha Soomaaliya waxa ay su'aal gelisaa suurta-galnimada kaalmaynta ku laabashada iskeed ah ee laga warbixiyey gobolada halkaa soo nabadgalyadu ay su'aali ka taagan-tahay. Si kastaba sida loo arko nabad-gelyada iyo marinada macluumaadka maxalliga ah ee quudinaya go'aan samaynta IDPs-ka ayaa aad u adag in la cabbiro oo la qiimeeyo iyada oo ay sababtu tahay macluumaad yaraan. Warbixintu waxa ay tilmaamtaa IDPs ay qabsatay xaalad aan guulba lahayn ooa laba daran mid dooro una dhexeeya degaanaa IDP-ga iyo goobaha ay u noqonayaan marka loo eego nabad-gelyada.

Xalalka Waara. Cilmi baaristii waxa ay iftiimisaa in aysan jirin xalal waara marka ay meesha ka maqantahay isku xirka kahor iyo kaddib laabashada marka loo eego barnaamijka laabashada IDP-ga ee uu fuliyey Ururka Laabashada Soomaaliya. Marka laga yimaaddo fududaynta laabashada iyo heerka ugu yar ee fara-qabsi oo ay ku jiraan fara-qabsi xagga nolol-maalmeedk ah, duruufaha nololeed ee ka faa'iidayds-tayaashii la caawiyey waxaa la arkay in uu dhaco waqtiba ha qaadatee.

Kormeeridda, Difaaca, Caadiyeynta iyo Taba-barka ee gudaha barnaamijka laabashadawaa in la xoojiyaa walaacyada difaacana si joogta ah looga warhayaa oo loogu gudbiyaa hay'aadka ay khusayso.

Nooca Gar-gaar ee SRC da. Nooca gar-gaar ee SRC da waa nidaam wanaagsan oo lagu caawiyo dadka barakaca, oo fayda caqabadaha helitaanka, xiriirinta iyo wadaagidda khayraadka Soomaaliya. Nidaamkii jawaab celinta iyo cabasho dhiibashada wuxuu ka faa'iidaystayayaasha u furay Marin isgaarsiineed. Nidaamka kala shaandhaynta ee hay'ado badan waxa uu yareeyey tiro ah kafaaiidaystayayaal aan jirin iyo ku soo noqnoqosho


Samee Iskuxir oo Dhis soo kabasho. Baaritaankii wuxuu si xoogleh ugu talo bixiyaa isku xirka u dhaxeeya jilayaasha samafalka iyo horumarinta ee xalal waara iyo in la dhiso soo kabashada bulshooyinka baro kacay ka hor iyo kaddib laabashada si ay ula qabsadaan caqabadaha isa sii beddelaya ee kajira Soomaaliya.

ARRIMO IYO DAREENNO

Joogitaan Waari-kara. Macluumaadka la aruurshay ayaa gabi ahaanba tusinaya in ay qoysas ku laabteen deeganadii barakaca. Celcelis tira ahaan dadka maqan waxay gaarayaan 2-4% halka 96-98% qoysaska ay caawisay SRC ay weli baaqi ku yihiin deeganadii asal ahaan ka yimadeen ee la geeyay tan iyo markii la bilaabay soo celinta dhamaadkii 2012 ama bartamihii 2013. **Lid ku ah** boqolkiiba 20% Wareega koowaad ee PRA jawaab bixiya yaalka waxa ay sheegeen xiligii dabagalka in ugu yaraan xubin kamid ah qoyska in aysan kula nooleen deegaanka lagu soo laabtay, taas oo kaddib ka dhigaysaa boqolkiiba 60% wareega labaad. Dadka in ay dib ulaabtaan waxa ay dadka qaar sabab uga dhigeen amni darro, taasoo arintani ka dhigaysaa barakac soo cusboonaday, laakin sidoo kale arimaha la xariira baadi goobka fursado nolol wanaagsan iyo sababo kalaba lama xiriiran in ay sababaan barakac.

Gulaha xalalka waara laga gaaray. Waqti xaadirka, xalalka waara ma aha kuwo lagaaray maadaama duruufaha noqdayaasha la ogaaday in ay hoos ugu dhacaan ka dib marka uu ka dhammaado faraqaabsigii ahaa heerka ugu yar ee muddada lahaa. Laba tusiye oo ku tusaya:

- **Hooy:** Halkii kaliya 1/3 jawaaba-yaal ay filayeen in ay ugu noolaadaan hooy kumeel gaar ah meelaha lagu baro-kacay, illaa 3/4 ayaa ku nool hooy ku meel gaar ah laabashada kaddib.
- **Cunto Sugid:** 40% oo jawaaba-yaal IDP ah ayaa cabsi ka qabay helitaan xaddidan oo ah raashinka marka ay noqdaan, oo tiro badan oo noqdayaal IDP ah ayaa waxa ay ku warbixiyeen in aysan haysanin wax ku filan oo ay cunaan 7 maalmood gudahood. Dhacdada raashin ku fillaan la'aantu si suuqiyan ah ayay waqtiga isugu beddeshaa oo ayna dhacdaa wax ka badan laba jeer badanaana ah marka in badan la joogo goobta noqoshada.
- **Nabadsugidda iyo Macluumaadka:** Nabadgelyadu waligeed way kobcaysay oo isku beddelaysay gudaha Soomaaliya. SRC waxa ay fududaysaa Aadidda iyo Boqasho Aragga (GSVs) oo qaadayso weftiyo IDPs ah oo ku noqonaya goobahoodii noqoshada ka hor si ay u qiimeeyaan nabad-gelyada iyo adeegyada ka hor fududaynta noqoshada – tallaabada ugu muhiimsan ee ah in lagu wargeliyo IDPs-ka ee ku saabsan meesha lagu noqonayo. Si kastaba, kormeeriddu waxa ay muujisaa in inkastoo kaliya 2% oo ah IDPs ay ka baqayeen nabad-gelyo darro (kahor GSVs), ku dhowaad 47% oo noqdayaasha ah kuwaa soo joogay sannad ku dhowaad goobtii noqoshada ayaa ku warbixiyey in ay nabadgelyo daradu walaac lee dahay.




RETURN CONSORTIUM | Somalia

Towards durable solutions to end displacement

UNHCR- ayaa yegleeshay Dallada Dib udejinta taas oo la dhisay sanadkii 2012kii iyadoo looga gol lahaa in ay hormariso iyo in ay siiso caawimaad la qoondeeyay, lagana shaqeeyay dadka ku barakacay gudaha soomaaliya ee doonay in ay ku laabtan halka ay markii horre ay kazoo barakaceen.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Daladda Dib u Dejinta Soomaaliya, waxaad ka helikartaa UNHCR Soomaaliya.

E-mail: procacci@unhcr.org or holm@unhcr.org



Samuel Hall waxa ay ku takhaqustay la talinta qaybta dadweynaha dhaqanka-dhaqaale, baarista iyo falanqaynta gargaarka iyo horarinta.

Waxaan si dhaw ula shaqeenaa hay'adaha gargaarka, hay'addaha hormarinta, deeq bixiye-yaasha, hay'addaha sida gaarka looleyahay iyo hay'adaha waxbarashadda .

Nairobi, KENYA

Kabul, AFGHANISTAN

Paris, FRANCE

development@samuelhall.org

www.samuelhall.org

Somalia Return Consortium members:

